

Deeqda Dhaqaale ee Dawlada Hoose Farshaxanka Deegaanka Suuqa Hoose (MRAC)

Kusoo dhawaw MRAC! Waxa aanu ku faraxsanay in aad danayso barnaamijkeena. MRAC waxa weeye hay'ad samofal oo hormar ku samaysa helitaanka farshaxanka bulshooyinka oo todoba degmo aaga suuqa hoose ah ee degmooyinka Anoka, Carver, Dakota, Hennepin, Ramsey, Scott, Washington kuwaas oo usoo marta taageerada farshaxanka iyo hay'adaha.

MRAC waxa ay leedahay afar (4) barnaamij oo deeqood:

Taageerada Dabacsan waxay bixisaa ilaa \$15,000 oo deeqda ah si looga caawiyo kooxaha samaynta iyo joogtaynta helitaanka reer Minnesota farshaxanka. Cinwaanka kowaad ee kooxda u qalanta waa inay ku taalaa degmada Carver, Dakota, Hennepin, Ramsey, Scott ama Washington. Barnaamijkan waxa uu taageeraa mashaariicda samaysa farshaxanka, iyo/ama mashaariicda xoojinta awooda hay'ada iyo shaqada ee kooxda bixita helitaanka farshaxanka. Arjiga Wareega 1 oo ku eeg Agoosto 1, 2022 11:59 habeenimo. Arjiga Wareega 2 oo ku eeg Febraayo 13, 2023 11:59 habeenimo.

Deeqda **Arts Impact for Groups** waxay siisaa lacag dhan ilaa \$10,000 deeqda ah kooxaha ay hogaamiyaan Dadka Madaw, Dhalad, iyo Midabka ah (BIPOC);iyo/ama Dumarka iyo Raga Khaniisiinta ah, ama Jinsiga Badalay, ama Labada Jinsiba Wax Ka Daya (LGBTQIA2+). Kooxda waa inay ku dugnaataa degmooyinka Carver, Dakota, Hennepin, Ramsey, Scott iyo Washington. Deeqdan waxaa loogu talo geley in la geliyo maalgelinta lagu taageerayo kooxda awooda inay baurto farshaxan. Arjigan waxa uu ku eeg yahay Noofember 21, 2022 11:59 habeenimo.

Deeqda **Arts Impact for Groups** waxay siisaa lacag dhan ilaa \$5,000 deeqda ah mashaariicda farshaxanka ee Minnesota ee uu wado qof Madaw, Dhalad, iyo Midabka ah (BIPOC);iyo/ama Qof Laxaad La' (PWD) iyo/ama Dumarka iyo Raga Khaniisiinta ah, ama Jinsiga Badalay, ama Labada Jinsiba Wax Ka Daya (LGBTQIA2+). Shakhsiyadku waa inay yeeshaan cinwaan degmooyinka Carver, Dakota, Hennepin, Ramsey, Scott iyo Washington ah. Deeqda waxaa loogu talo geley in lagu taageero shakhsiyadka hogaamiya dadaalka lagu abuurayo helitaanka farshaxanka ee bulshooyinka iyo/ama wada shaqaynta bulshooyinka ee farshaxanka. Arjigan waxa uu ku eeg yahay Diseember 12, 2022 11:59 habeenimo.

Deeqda **Next Step Fund** waxaa loogu talo geley inay ka caawiso farshaxanada dhamaystirka mashaariicda diirada shakhsiyadka farshaxanka ah iyo/ama curinta yoolashada xirfadeed ee anshaxa farshaxanka. Mashaariicda waxaa lagu sheegey khidadaha ka caawin kara farshaxanka inay ka gudbaan cabqadaha guusha, lasii wado gusha mihnada farshaxanka, iyo/ama inay ka caawiso ka faa'idaysa fursada. The Next Step Fund waa deeq ay bixiso McKnight Foundation oo lagu siiyo helo deeq ilaa ah \$5,000 farshaxanada leh qaababka kala duwan. Dalbadayaal heer kasta oo mihnadooda ah maraya, laakiin awooda inay bixiyaan muunado shaqo oo farshaxanka ay iyagu abuurteen ah. Farshaxanka shakhsi ahaaneed waa inay yeeshaan cinwaan deganaansho oo degmooyinka Carver, Dakota, Hennepin, Ramsey, Scott iyo Washington ah. Arjigan waxa uu ku eeg yahay Janaayo 9, 2023 11:59 habeenimo.

Wixii faahfaahin dheeraad ah booqo www.mrac.org. Hadii aad u baahan tahay macluumaadka oo lagu turjubo ama baahi qaabilaad aad qabto, waxa aanu ku siin kartaa qaabilaad marka aad laba todobaad kahor nala soo socodsiiiso. Waxa aad kala hadli kartaa Maamulaha Barnaamijka wixii taageero ah. Fadlan nagala soo xidhiidh mrac@mrac.org.